



Barnaamijka Waxbarashada Xaggaaga ee Ardayda PPS

Juun 6, 2022

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Sanadkani barnaamijadeena waxbarashada xilliga xaggaaga 2022 waxaa loo qorsheeyey inay bilaabmaan horaanta bisha Juun 21keeda. Barnaamij xaggaagu ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waa mid aad u ballaaran taariikhda gobolkeena kaasi oo ku kacaya adduun dhan \$15 Malyuun oo doolar.

Barnaamijiyada waxbarasho oo tayadoodu aad u sarreyso

Waxaa jira fursado loo diyaariyey dhammaan ardayda da' kasta leh oo ay ka mid yihiin in laga taageerayo waxbarashada, inay ardayda dugsiyada sarre buuxiyaan buundooyinkood ka dhiman, in la kobciyo hawlaha kala duwan, siinta waayo-aragnimo waxbarasho oo taageereysa dhaqan u gaar ah, iyo taageero u gaar ah ardaydeena naafada ah. Barnaamijiyadani waxaa bixinaya shaqaale ka mid ah PPS oo haysta ruqsadaha wax barista iyo saaxiibada bulshada labadaba. Fadlan waxaad halkan hoose ka fiirisaa ikhtiyaaraadka. Waxaad wax badan ka baran oo ku saabsan [Linkiga Barnaamijiyada waxbarasho tayadoodu sarreyso](#), ee PPS.

Dheereynta Waxbarashada iyo Kobcinteeda

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay iskaashanayaa in ka badan 50 hay'adood oo bulsho kuwaasi oo martigalinaya xeryaha kobcinta xaggaaga oo **bilaash ah**, iyada oo ay siinayaan in ka badan 7,500 oo arday kana kala socda dhammaan dugsiyada Portland.

Wax ka badan 50 barnaamij, PPS waxay bixin doontaa fursado kobcineed oo badan kalana gedisan. Halkan waxaad ku arki doontaan qaar ka mid ah barnaamijiyada oo kooban:

- **Village Resiliency (U Adkeysiga Tuulada)** - Waxa ay u addeegi doontaa Wellness Squads barnaamij ardayda dugsiyada dhexe kuna salaysan barashada iyo sidii ay u cabiri lahaayeen hal abuurnimada sida ranjiyeynta kabaha/nashqadeynta, sameynta shamaca, agabka loo addeegsado walaaca. Waxaana diirada lagu saarayaa dhisida bulshada iyo caafimaadka shucuurta, maareynta walaaca iyo aqoonsi ku dhisan caafimaad.
- **Feed the Mass (Quudinta Tiro Badan)**- waxay bixin doontaa Sayniska Nololaha iyo barnaamijiyada Guusha Dhismahooda kuwaasi oo siinaya xirfado dhab ah oo dhinaca nololaha ah, STEM, iyo Saynis Ku Salaysan waxbarashada oo dhammaan da' kasta la siinaya sida sayniska cuntada iyo diyaarinta iyo Lego Robotics.

- **Hand2Mouth (Afka iaa Gacanta)**- Xeryaha masraxa wuxuu ardayda siin doonaan da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 18 sanno waayo-aragnimo leh dhinacyo kala duwan oo ah dhammaan dhinacyada bandhigyada masraxa ah ayna ka mid yihiin ardayda ku hadasha luqada Isbaanisha iyo kuwa baranaya.

Fadlan booqo www.ppsfamilysupports.com si aad u aragto fursadaha. Halkan iska diiwaangali [quick link to instructions](#) .

Waxa kale oo ka mid ah barnaamijyadani in ka badan 500 fursadood oo ah shaqaaleysiinta dhallinyarada iyada oo ardayda dugsiyada sarre ay ka heli karaan mushahar la taaban karo sidoo kale inta ay ku gudo jiraan raacdeynta shaqooyinka sayniska, teknoolajiga, daryeelka caafimaadka, iyo farshaxanka.

- **IRCO** – waxay siin doontaa fursado shaqo 30 arday kuwaasi oo qaadan doona gunno lacageed oo dhan \$1,000 doolar, sidii ay uga qeybqaadan lahaayeen addeega bulshada iyo mashruucyada dib u hagaajinta bulshada. Ardayda ka shaqeyneysaa waxay taageeri doonaan barnaamijyada horumarinta iyo Shaqaalaha Dhallinyarada IRCO.
- **SEI** – waxay siin doontaa shaqo 40 arday oo dugsiyada sarre ah inay noqdaan kalkaaliyaal tababare iyo macalliin barnaamijyadooda xaggaaga oo todobaadkiiba ay 30 saacadood la siin doona ardayda saacadiina \$16 doolar.
- **Bravo Youth Orchestra** – waxay siin doontaa 20 la-taliyaal arday saacadiina qaadan doona \$17 doolar saacadii, sidii ay u taageeri lahaayeen Barashada farshaxanada ee goobaha ay ka socdaan barnaamijyadoodu.
- **Portland Playhouse** – waxay siin doontaa 18 arday oo ah dugsiyada sarre saacadiiba \$17 doolar saacadii kalkaaliyaasha macallimiinta kuwaasi oo taageeri doona fasalka gudihiisa iyo dibadiisaba Maamulaha Xirfada Dhallinyarada, waxayna ka qeybqaadan doonaan todobaadkiiba kulanka shaqaalaha dhammaan shaqaalaha xerada iyo inay la kulmi doonaan hal mar todobaadkiiba si wada jir ah Maamulaha Xirfada Dhallinyarada sidii ay uga taageeri lahaayeen baahiyaha koriinka iyo barashada.

Waxaa jira wali waqti ay qoysasku ay ku diiwaangalin karaan ardaydooda barnaamijyadani, oo ay ka mid yihiin xannaanada caruurta oo lacag la'aan ah. Fadlan waxaad ka fiirisaa liista ikhtiyaaraadka halkan pps.net.

Wada jir ayeynu hore u soconeynaa,

Dr. Cheryl Proctor

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, Casharada iyo Bulshooyinka Dugsiyada